

Somali

Naafaynta Xubinta Taranka Dumarka

NAAFAYNTA

XUBINTA TARANKA

DUMARKA

WAXAY KASOO HORJEEDA

SHARCIGA

NEW SOUTH WALES

Bogan qoraalka waxuu kusaabsan yahay sharciga
New South Wales ee kasoo horjeeda Naafaynta
Xubinta Taranka Dumarka "FGM"

Dadka badankood waxay kumagacaaban Naafaynta
Xubinta Taranka Dumarka "Gudniinka Dumarka"

"Naafaynta Xubinta Taranka Dumarka" iyo
"Gudniinka Dumarka" waa isku mid

Sharciga maxuu ka sheegay.....

**Naafaynta Xubinta Taranka
Dumarka**

Halkan New South Wales



**NSW Education Program on FGM
Locked Bag 7118
PARRAMATTA CBD NSW 2124**

Phone: 02 9840 3877

NSW Education Program on FGM
Funded by NSW Health

www.wslhd.health.nsw.gov.au/NSW-Education-Program-on-Female-Genital-Mutilation--FGM-

FGM Sharciyadiisa NSW – Suaalo iyo Jawaab

Sharciga maxuu kayiri Naafaynta xubinta taranka dumarka (FGM)?

Qodobka 45 ee NSW Dambiyada Qeexaya waxuu leeyahay FGM lama ogola. Qofna masameyn karo:

- “Goyn, toltolid ama jarjarid qeyb mise kuligood bishimaha yaryar iyo kuwa waaweyn, mise kintirka qofkasta uu ahaado”, mise
 - “macaawin kartid, madhiiri galinkartid, talo kamaasiin kartid mise in aad kukaalmeysid qof in uu ficilkan kudhaqaaqo
- Arintan micnaheeda waxay ka horjeeda sharciga ah:**
- Gudniin haweenay, gabar mise gabar yar
 - In lasaaro mise lajaro qey kamida xubinta taranka dumarka (‘goyn’) mise
 - Latolo xubinta taranka (toltolid) mise
 - Lagooyo kintirka ama qeyb kamid ah kintirka, mise
 - Ladhaawaco xubinta taranka hareeraheda siday ahaataba.

Markuu sharciga leeyahay qofna kuma “caawinkaro, mana dhiiri galenkaro, talona kama geysankaro, mana baraarujin karo” qofka sameeya FGM, micnaheeda waxay tahay in arintan ay kasoo horjeedo sharciga:

- Qofkale kuma caawini kartid in uu sameeyo ficilkan ama
- Qofkale uu ku kaco ficilkan

Sharciga waxuu hirgelinayaa in uu joogiyo dhaqamada qaarkood oo dhaawacaya xubinta taranka dumarka iyo hareeraha, waxaana lagu tilmaama dabti dhaawac gaarsiin qeyba NSW Dambiyada Qeexaya.

Maxaa dhacaya hadii qof jabiyiyo sharciga?

Qofki sameeya FGM xabsi ayuu geliyaa 21 sano.

Ciqaabtan waa isku mid hadii uu qof caawiyo qofkale, mise uu qofkale usameeyo FGM.

Majirtaa wax qaliin oo leysku ogolyahay?

Haa, sharciga wuu ogolyahay wax qaliin oo kusaabsan:

- Daruuri u ah caafimaadka qofka uuna sameeyay dhaqtar taqasus uleh; mise
- Daruuri caafimaad ay keentay goorta ilmaha dhalanaayo ama markuu ilmaha dhasho kadib, uuna sameeyay dhaqtar taqasus uleh ama umuliso; mise
- Bedelaad ubaahan qeybta galmada taaso oo ay keentay daruuri uuna sameeyo dhaqtar taqasus uleh iyadoo daruuri ay jirto.

Sharciga waxuu leeyahay arin daruuri ah oo “caafimaad aawaded” keentay qof waa loo texgalinayaa markuu qaliin ubaahdo.

Masamayn karnaa FGM dhaqanka daraadis?

Maya. Marka kaliya oo qaliin lasameynkaro waa kuwa kor lagusoo sheegay.

Masamayn karnaa FGM hadii qof dumar mise gabar ay raali katahay in lagudo?

Maya. Sharciga waa kasoo horjeeda in lasameeyo FGM xataa hadii ay raali katahay qofka dumarka mise gabadha ay rabto.

Makusoo samayn karnaa wadankale mise gobol kale halkan Australia?

Maya. Hadii qof dumar ah, gabar mise ilmo dhiidig ah oo halkan New South Wales degan, sharciga ma’ogola in FGM lagu sameeyo xataa haday tahay wadankale mise gobol kale Australia kamid ah.

Matoli karnaa (toltolid) qof dumar markey ilmo dhasho kadib, mise markay marto qaliin xaga xubnaha taranka?

Dhaqtar taqasus uleh un ayaa toli kara qof dumar ah mise gabar yar hadii uu go’aamiyo daruuri caafimaad inuu jiro. Dhaqtar, umuliso mise kalkaaliyaha dhaqtarka way toli karaan qof dumar ah mise gabar yar hadii uu caafimaad daraaded ay keentay foosha mise markay dhaleysay.

Yaa laga rabaa in uu ogaysiiyo FGM dawlada?

Sharciga waxuu leeyahay dhaqaatirta waa in ay ogaysiiyan FGM gudoomiyaha wasaarada caafimaadka hadii FGM lagu sameeyay ilmo yar oo da’diisa kayar 16 sano.

FGM waxaa lagu tilmaamay xadgudub ilmo halkan NSW.

Sharciga ciyaalka iyo dhalinyarada qodobka

(xanaaneynta iyo badbaadada) laqeexay 1998 waxuu amrayaa dad badan oo kashaqeeya howlaha ciyaalka iyo dhalinyarada in ay ogaysiiyan “dhibaataada markaa jirta” ayagoo “tuhmaaya qatar” in ilmaha kujiro, oona ogaysiinaya hey’ada

daryeelka bixisa ee NSW. (Ilmo mise ciyaal waa qof da’diisa kayartahay 16 sano). Dadka lagu amray in ay hey’ada ogaysiiyaan waa shaqaalaha caafimaadka, macalimiinta, shaqaalaha ciyaalka xanaaneeya, shaqaalaha curyaamiinta iyo bolliiska.